



Congress Party -Mogadishu, Somalia

Tix. (01/2015)

Warsaxaaafadeed Shirweynahii Kowaad ee Xisbiga Kulan

(Muqdisho: 26-02-2015) Dadaal soo socday muddo sanad ka badan kadib, waxaan qabsanay Shir-weynahii kowaad, Annagoo ah Muwaadiniin Soomaaliyeed oo ka dhiidhiyay duruufta dalku marayo ee xagga Siyaasadda, Dhaqaalaha & Bulshada, Islamkaasna dareensan waajibaadka ka saaran badbaadinta dalka & dadka.

Sidoo kale markaan aragnay Qod. 22aad, Faqraddiisa 1aad ee Dastuurka Ku-Meel Gaarka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxan aasaasnay Xisbiga magaaciisa la yiraahdo **Kulan**.

Mudadii Shir-weynaha uu noo socday (19-20/02/2015) waxan ansixinay Xeer Hoosaadka Shirweynaha, Xeerka Xisbiga, waxan si dimuquraadiyad ah oo waafaqsan Xeerarka Xisbiga dooranay Hogaanka Xisbiga iyadoo Gudoomiyaha **Xisbiga Kulan** loo Doortay Mudane Cabdulqaadir Maxamed Cusmaan (Barnaamij), sidoo kalena loo doortay Gudoomiyaha Golaha Dhexe Mudane Muxyudiin Maxamed Xaaji Ibraahim.

Gabagabadii Shir-weynuhu waxa uu walaac ka muujiiyay Duruufta adag ee siyaasadeed, dhaqaale, iyo Amni ee dalku marayo iyadoo mudadii la soo dhaafay uu hareeyay geedi socodka siyaasadeed khilaafaad, dhanka amaankana dib u dhac weyn, duruufta dhaqaale ee dadka iyo dalka haysatana waxay noqotay mid aad u liidata, iyadoo rajadii ay Bulshada Soomaaliyeed & Beesha Caalamku ay ka qabtay Hogaanka Dalkana uu mugdi galay.

Xisbiga Kulan iyadoo maanta ay tahay Xafladii Daahfurka wuxuu ugu baaqayaa:

1- Bulshada Soomaaliyeed in aysan Rajada lumin, ayna u darbato sidii ay uga gudbi lahayd xaalada adag iyadoo aan ugu baaqayno bulshada rayidka ah in ay dowlkeedii lixaadka lahaa ay u gudato si geesinimo leh.

2- Hogaanka Dalka:-

- in si geesinimo leh uu u qirto fashilka Siyaasadeed, kan amni, sidaa darteedna aan khilaaf siyaasadeed uusan ka dhix dhicin Madaxweynaha & Xukuumadda ama laamaha kale ee Dowladda.
- In Talada Higsiga 2016 in loo soo celiyo Shacabka, oo aysan dhicin Waqtii kororsi, iyo musuq maasuq.
- In Maamul Goboleedyada dhismaya aanan loo adeegsan awooda dowladda dhexe si loo saaro murashixiin gooni ah gaar ahaan xilka Madaxweynayaasha Maamul Goboleed soo socda.

3- Xoogaga Mucaaradka in ay midoobaan, kasbadaan bulshada, si ay u suurta geliyaan isbadal dhab ah in uu ku yimaad aragtida hogaminta dalka iyadoo saldhig looga dhigay wada tashi iyo in la wadaago talada iyo xukunka dalka.

4- Dhamaan in la joojiyo Colaadaha noocay doono ha ahaadeen, lana xusuusto dhiiga daadanaya in uu yahay dhiig soomaaliyeed.

5- Bulshada Caalamka in ay sii joogteeyaan garab istaagida Dadka & Dalka Soomaaliya, iyadoo la dhisayo laamaha Dowladda, lana dhiiri gelinayo horumarka dhan walba ah.

DHAMAAD